
## Ku deeq dhiigga xuduntaada!

**Miyaad adigu/idinku rabtaan inaad ku deeqdaan? Buuxi:**

**- caddeyn caafimaad**
**- oggolaansho**

**...aad kala soo bixi karto boggayaga internetka oo aad u soo qaadan karto wareysiga diiwaangelinta.**

**Waxaad sidoo kale noo sheegi kartaa xilliga isdiiwaangelinta si aannu kuu siinno dokumentiyadan.**



## Miyaad rabtaa inaad wax dheeraad ah ogaato?

Nagala soo xidhiidh ummulisooyinkayaga:

La hadal 031-343 63 10 ama emayl u soo dir navelstrangsblodbanken@vgregion.se

Wax dheeraad ah ka akhri:
www.sahlgrenska.se/su/navelstrangsblodbanken

Waxaad bogga internetka ka helaysaa macluumaad luqadahana soo socda:
Ingriisi, Faransiis, Isbaanish, Boolish, Ruush, Serbo-Korowaat, Turki, Carabi, Faarisi, Koonfurta Kurdistaan (Soraani), Soomaali,

SAHLGRENSKA UNIVERSITETSSJUKHUSET
VGR

Noofambar 2025





# Ku socota qofka dhawaan ilmo dhalaya

Dhiigga xuddunta ee ilmahaagu wuxuu badnaadin karaa

SAHLGRENSKA UNIVERSITETSSJUKHUSET
VGR

## Naga caawi inaanu nolol badbaadino

Dhiigga xudduntu wuxuu leeyahay sifooyin gaar ah oo loo isticmaali karo in lagu badbaadiyo nolol. Sidaas darteed dawladda Iswiidhan waxay go'aansatay inuu jiro bangi qaran oo la dhigo dhiigga xudunta.

Marka ilme uu soo dhasho kadib, waxoogaa dhiig ah ayaa ku hadha mandheerta iyo xundhurta. Dhiiggan waxa ku jira unugyada abuura dhiigga, waxaana loo isticmaali karaa dawaynta dadka cudurada xunxun qaba iyadoo lagu samaynayo beeritaan (transplantation). Tani waxa tusaale ahaan lagu isticmaalaa carruurta qabta cudurka kansarka dhiigga (leukaemia) ama cudurrada kale ee dhiigga. Cudurradan waxa badanaa maanta lagu daweeyaa iyadoo lagu beero unugyada abuura dhiigga ee laga soo qaado unugyada dhiigga ee ku jira dhuuxa lafta, laakiin dhiigga xudunta ayaa noqon kara beddel kale.

Ku deeqista dhiigga xudunta ee ilmuhu waa mid ikhtiyaar loo yahay waxaanay u baahan tahay oggolaanshaha masuulka/masuuliyiinta.

**CECILIA LANGENSKIÖLD**
Dhakhtar sare oo caruurta
Masuulka caafimaadka ee Bangiga Dhiigga Xuddunta ee Qaranka
(Nationella Navelsträngsblodbanken)
Sahlgrenska Universitetssjukhuset

Miyaad rabtaa inaad wax dheeraad ah ogaato, markaas ayaad:

- La soo xidhiidhi ummulisooyinkayaga:

  031-343 63 10

  navelstrangsblodbanken.su@vgregion.se

  Bangiga Dhiigga Xudunta ee Qaranka
  (Nationella Navelsträngsblodbanken)
  Sahlgrenska Universitetssjukhuset
  Diagnosvägen 15
  416 85 Göteborg

- Booqashada www.sahlgrenska.se/su/navelstrangsblodbanken

## Su'aalo iyo jawaabo ku saabsan ku-deeqidda dhiigga xudunta

**Sidee ayaa qaadista dhiigga loo sameeyaa?**
Waxa qaadistu dhacaysaa xilliga qalliinka uurka ee la qorsheeyey taasoo macnaheedu tahay in marka ilmuhu dhasho, dhiigga loo oggolaado inuu ka soo qulqulo mandheerta ilaa ilmaha hal minit, ka hor inta aan xuddunta biin lagu qaban oo la jarin. Dhiigga ku hadhsan xudunta iyo mandheerta ayaa la ururinayaa oo la qaadayaa.

Dhakhtarka carruurta iyo dhakhtarka dhalmada ee jooga cisbitaalka jaamacada ee Sahlgrenska ayaa oggolaanaya in dhiigga xudunta la qaado.

**Sidee ayaa dhiigga iyo macluumaadkaba loo maaraynayaa?**
Dhiigga laqa qaaday xudunta waxa loo dirayaa Bangiga Dhiigga Xudunta ee Qaranka, cisbitaalka jaamacada ee Sahlgrenska ee Göteborg, halkaas oo isaga oo barafaysan lagu kaydinaayo.
Waxa halkaas ka heli kara cid kasta oo u baahan beerista unugyada dhiigga xudunta – ha joogaan Iswiidhan gudaheeda ama dibadeeda

Nidaamka sir haynta/qarsoodiga caadiga ah ee laga isticmaalo daryeelka caafimaadka ayaa khuseeya macluumaadka adiga kugu saabsan iyo ka ilmahaaga, iyadoo xogtiinana loo maareyn doono si waafaqsan Xeerarka ilaalinta xogta (GDPR) si qof aan ruqsad u haysanini ugu heli karin macluumaadka.

**Miyey jiraan wax baadhitaano ah oo loo baahan yahay in la sameeyo?**
Waxaanu tijaabo dhiigga ah kaa qaadnaa xilliga qalliinka uurka si aanu meesha uga saarno hadday jiraan cudurada caabuqa/infegshanada faafa ee halista ah kuwaas oo khatar u geysan kara caafimaadka qofka lagu beeraayo dhiigga xudunta. Wax tijaabo dhiig ah lagama qaado ilmaha. Macluumaadka adiga ku khuseeya iyo xaalada caafimaadka ee ilmahaaga ayaa la qorayaa/diiwaangaliyaa lana keydinayaa si ay noogu fududayso inaanu helno cid ku habboon dhiigga xundhurta

Haddii tijaabada dhiiggaaga ama dhiigga xudunta ee ilmahaagu ay muujiso wax aan caadi ahayn, waxaanu kula soo xidhiidhi doonaa si aanu kuuga sheegno waxa ay tani ka dhigan tahay.

Waxaanu sidoo kale u baahan nahay inaanu ogaano waddanka aad adiga iyo aabaha ilmuhu asal ahaan ka soo jeeddaan. Tani waxay naga caawinaysaa marka ay tahay inaanu go'aansano nooca nudda ee dhiigga ku jirta iyo marka dambe oo aanu go'aansanayno haddii dhiigga xuduntu ku habboon yahay bukaan gaar ah.

**Miyey jiraan wax diin ahaan mamnuuc ah?**
Hoggaamiyayaasha hormoodka u ah bulshooyinka ugu waawayn Iswidhan, sida, kiniisadaha Kiristanka ee kala duwan, bulshada Yuhuuda iyo Muslimiinta ah, waxay, bayaan wadajira ah dhammaantood ku sheegeen in diimahoogu taageerayaan ku deeqista dhiigga xudunta.

**Miyay jiraan wax faa'iido gaar ah oo laga leeyahay?**
Maya. Maya Bangiga Dhiigga Xudunta ee Qaranku waxa uu ku shaqeeya iyadoo aan gabi aanba faa'iido gaar ah laga laheyn. Bangiga dhiigu waa xarun dadweynhu leeyahay markaa in waxa la dhigo si gaara loo isticmaalaayo ayaan la oggolayn.

**Miyaanu mar kasta kaydin karnaa dhiigga xudunta?**
Wakhti kasta oo maalinta ka mid ah ma qaadi karno dhiigga xudunta. Waxa kale oo dhici kara in dhiig aad u yar ku hadhi xuddunta marka ilmahaagu dhasho, oo aan ku filnaanaayn in la beero. Haddii qadarka dhiigu uu aad ugu yar yahay in beeritaan lagu sameeyo, ayaa xaaladaha qaarkood loo isticmaali karaa cilmi-baadhis. Cilmi-baadhista noocan ah waxa markasta oggolaada Guddida anshaxa ee gobolka adiga ayaan go'aaminaaya haddii aad rabto in dhiigga loo isticmaalo ujeeddadan.

**Sideen ayaa ku dhahaa haa haddaan danaynayo inaan ku deeqo?**
Taasi waxaad ku xaqiijineysa adigoo buuxinaaya foomka caddeynta caafimaad iyo oggolaansho. Waxaad kuwan ka soo dejisan kartaa websaytkayaga ama waxaa la buuxin karaa inta lagu jiro waraysiga diiwaangelinta.

Umulisooyinka bangiga dhiigga xuddunta ayaa ka qaybqaata waraysiga diiwaangelinta waxaadna heli doontaa fursad aad ku waydiiso su'aalo ku saabsan ku deeqista dhiigga.